

# ISU DIYAARINTA HOME HELP MN



**HomeHelpMN** Minnesota Housing waa goob aad ka heleyso caawimaad haddii aad COVID-19 awgiis uga dibdhacday bixinta rahmaadda ama aad ka welweleyso in guriga lagaala wareego. Laakiin ugu horreynta, hoos ka eego waraaqaha aad ugu baahan doonto codsiga:

## **Caddeynta lahaanshaha gurigaaga waa mid ka mid ah waxyaabaha soo socda (mid keliya ayaa laga rabaa):**

- Waraaqaha canshuurta guryaha (waraaqaha la doorbidayo)
- Waraaqada diiwaanka guriga
- Diiwaanka Qandaraaska iibsiga guriga
- Caddeynta Milkiilaha (guryaha ay warshad soo sameysay)

## **Aqoonsi sawir leh codsadeyaasha oo dhan:**

- Aqoonsi goboleed, mid ah federaalka, mid Qabiileed ama aqoonsiga sawirka leh ee codsadeyaasha

## **Waraaqaha dakhliga:**

Keen waraaqaha dakhliga ee ugu dambeeyey ee meel kasta oo aad dakhli ka heshaan adiga iyo xubnaha qoyska ee kugula qoran codsiga. Uma baahnid in aad keento waraaqaha dakhliga shaqada ee xubnaha qoyska ee da'doodu tahay ama ka yar 17 jir. Waxaa jira siyaabo badan oo aad u soo caddeyn karto dakhligaaga. Waxa keliya ee loo baahan yahay waa in qof kasta loo buuxiyo mid u gaar ah:

- Dakhligaaga guud ee canshuur-celiska, sida ku qoran Foomka Canshuur-celinta Dakhliga Federaalka ee 2021 oo noqon kara 1040
- **AMA** Dakhligaaga hadda, adigoo isticmaalaya macluumaadkaaga bixinta lacagta ee kuugu dambeeyey.
  - o Caddeymaha mushaarka
  - o Waraaqaha caddeynta
  - o Waraaqaha xaqu-yeelashada ee barnaamijyada kaalmada dawladda (sida Kaalmada Hawlgabka Dowladda Dhexe)
  - o Waraaqaha xisaabxirka bangiga oo muujinaya dhigashada lacagaha
  - o Waraaqaha kale ee lacag-bixinta
- **AMA** Xubnaha qoyska ee qaangaarka ah ee aan wax dakhli ah lahayn
  - o Saxiixa Caddeynta Dakhli-la'aanta ee dadka qaangaarka ah ee aan dakhliga lahayn oo dhan
- **AMA** Waxa ay ku xiran tahay lambarka boostada deegaanka (zip code), oo waxa lagaaga baahan karaa caddeymo dheeraad ah.

## **Waraaqaha kaalmada guriyeynta:**

- Waa in la keeno caddeymihii ugu dambeeyey ee kharash kasta oo la codsanayo in la iska bixiyo.
  - o **Bixinta rahmaadda:** Waa in la keento lacagta rahmaadda ee ugu dambeysay.
  - o **Lacagta laga bixiyo guriga la jiido/la soo warshadeeyey:** Waa in la keeno caddeynta amaahda ee ugu dambeysay
  - o **Kirada guryaha la jiido/la soo warshadeeyey:** Waa in la keeno ogeysiiska lacagihii la soo dhaafay.
  - o **Khidmadaha/kharashaadka iskaashatada, ururka guryaha ama milkiileyaasha guryaha:** Waa in la keeno caddeymihii ugu dambeeyey ee iskaashatada ama ururka guryaha.
  - o **Canshuurta guryaha:** Waa in la keeno caddeyntii ugu dambeysay ee degmada ama dowladda hoose.
  - o **Ceymiska guriga milkiilaha:** Waa in shirkadda ceymiska laga keeno caddeyntii ugu dambeysay ee lacagta ceymiska guriga.
  - o **Qandaraaska iibsashada Guriga:** Waa in la keeno caddeyntii ugu dambeysay IYO koobbiga waraaqaha Qandaraaska iibsashada Guriga.

Waraaqo caddeymo kale ayaa laga yaabaa in loo baahdo, balse waxay ku xiran yihiin xaalado gaar ahaaneed oo la xiriira codsiga.

**Codsiga marka la soo gudbiyo ma aha dammaanadqaad lagu helayo kaalmada. Oggolaanshaha dhabta ah ee kaalmada waxa uu ku xirnaan doonaa sida xaq loogu yeesho iyo maalgelinta la heli karo.**

